Soomaali oo Loo Tashaday: Aragtidii Dr. Cumar Cusmaan Raabe oo inay rumowdo u dhow

W/Q Cabdiraxmaan C. Faarax 'Guri Barwaaqo'

gbarwaaqo@hotmail.com



Badhtamihii 90kii, Dr. Cumar Cusmaan Raabe (AHUN) baa galab galbihii xagaagaasi ka mid ahayd bulshada soomaaliyeed u qabtay fadhi. Goobtu waxay ahayd xarunta Jaamacadda Ottawa (Ottawa University). Wuxuu Diktoorku halkaa ka jeediyey hadal uu nuxurkiisu ku salaysnaa buug-yare uu qoray, magaciisuna ahaa '***Soomaaliyeey, Halkee Baad Ku Socotaa***? '.
Galabtaasi waxaan ka mid ahaa dad badan oo

Soomaaliyeed oo aragtidaa Marxuunka saluugsanaa, una arkayey mid aan maangal ahayn, dhicina karin. Hayeeshee, 20 gu' kaddib waxa muuqda ifafaale isa soo taraya oo muujinaya jiritaanka aragtidii Marxuunka lagana yaabo inay u rumowdo si dhakhso ah. Waxaan haddaba

qoraalkan si kooban ugu eegi doonaa aragtidii (AHUN) Dr. Cumar Cusmaan Raabe iyo dhacdooyinka dhawaanahan jira ee innagu dhiirrinaya inaan rumaysanno aragtidiisii

Aragtidii Dr. Raabe

Sida laga wada warqabo, Itoobiya waa dawladda qudha ee aanay gumeystayaashii reer Yurub gumaysan, iyaduse ka qayb qaadatay inay gumeysato gobollo iyo dadyaw reer Afrika ah. Dr. Raabe wuxuu buug-yarahaasi kaga warramayaa sidii ay boqortooyadaasi u dal ballaadh-

Sawirka 1aad

U fiirso sida ay khariidadda Itoobiya isu beddeshey laga soo bilaabo 1884kii ilaa 1977kii. Sida khariidda (sawirka 12aad) ka muuqata, Jabbuuti weli waxay gacanta ugu jirtey gumeysigii Faransiiska. Jamhuuriyaddii Soomaaliyeedna wax si dhab ah u madax

Sawirka 2aad

1977kii kaddib

Sawirka 3aad

Dr. Cumar Cusmaan Raabe (AHUN) wuxuu oddorosay inaanay Itoobiya marna ka hadhin damaceedii ahaa dal bal-laadhisiga. Inta ay Soomaali-laand iyo Soomaaliya isku jeedaanna, xilli aan fogeyn, ay liqidoonto dalka Jabbuuti. Khariidaddeeduna noqon satay laga soo bilaabo 1884kii, kharii - daddeeduna u ahayd sida sawirka 1aad ku cad. Dr. Cumar Raabe wuxuu buug yarihiisa ku tilmaamay sida ay boqortooyada Itoobiya ugu soo siqday dalalkii iyo dadyawgii ay deriska la ahayd. Waxaanu aragtidiisa ku muuji - yey khariidaddan hoos ku sawiran.

Intii aanay Jabbuuti gobonnimada

1977kii kaddib, sida sawirkan kale ka muuqata, Jabbuuti way ka madaxbannaanaatay gumeystihii Faransiiska Khariidaddii Geeskuna waxay noqotay sidasawirka 3aad ka muuqatan.

Sawirka 4aad

doonto sida dhanka bidix ka muuqata.

Sawirka 5aad

Sida khariidaddan kale ee dhanka bidix ka muuqata muujinayso, Dr. Cumar waxa uu oddorasay in Itoobiya xilli aan fogeyn oo qarnigan dhexdiisa ah ay marka hore liqidoonto (qabsandoonto dalka Soomaaliyaa).

Sawirka 6aad

Soomaalilaand kama badbaadi doonto qabsashada ay ku taamayso Itoobiya inay wada qabsato dalalka Soomaalida. Sidaasi awgeedna waxa uu Dr. Cumar, Alla Ha u Naxariistee, oddorosay inay Soomaalilaand noqon doonto dalka ugu dambeeya dalalka Soomaalida ee ku dhicidoona gacanta gumeysiga Itoobiya sida ka muuqata khariidaddan, taasi oo soo af jari doonta sheegashadii ay Itoobiya sheegan jirtey inay iyadu leedahay dhulka Soomaalida gebi ahaantiiba.



Sawirka 7aad

Arrinku si kastaba ha ahaadee, warbixin lagu faafiyey, dhawaan, warbaahinta oo ku saabsan himilada iyo hanka siyaasadeed ee ay dawladda Sucuudigu ka leedahay Geeska Afrika ayaad mooddaa inuu u fududayn doono Itoobiya inay rumayso siyaasaddeedii dhul ballaadhsiga ahaa ee ay ulaha booca ah ugu tukubeysey. Warbixin taasi oo uu sarkaal ka tirsan boqortooyada Sucuudiga lana yidhaa

Anwar Al-Cishqi ka jeediyey golaha xidhiidhka debedda ayaa yidhi[1]:

'…. *Dhanka Gacanka Carabta waxa jirta meel Rubcul-Khaaliga ka mid ah oo uu ceegaago batrool loona baahan yahay, ama ay tahay, inay dawladaha Gacanka iyo Yaman u midoobaan ilaalintiisa iyo wax-ka-taransigiisaba. Midawgaasi wuxuu u qaabaysnaan doonaa qaabka uu u dhisan yahay xeerka Maraykanku, kaasi oo mideeyey Maraykanka una oggolaaday ku dhaqanka Dimuqraaddiyadda. Hayeeshee ka kale ee ceegaaga gobolka 'Ogaadeen', waa siduu Sarkaalku hadalka u dhigaye, waxa la midayn doonaa dalalka Geeska Afrika ayaga oo la hoos geyn doono dawladda Itoobiya. Waxaana la dhisi doonaa kaabad (buundo/bridge) u dhaxayn doonta Geeska Afrika iyo Gacanka Carabta. Waana kaabadda Annuur oo isku xidhi doonta magaalada Annuur ee Jabbuuti iyo magaalada Annuur ee dalka Yaman, taasi oo u baahan fulinta dhawr arrim oo kala ah:*

1. *Nabad laga dhex dhaliyo Carabta iyo Yuhuudda.*

2. *Isbeddel lagu sameeyo hab siyaasadeedka dalka Eeraan (Iran).*

3. *Midaynta dalalka Golaha Iskaashiga ee Gacanka.*

4. *In Yaman nabad lagu soo dabbaalo iyo in dib loo soo nooleeyo dekeddii xorta ahayd ee Cadan.*

5. *Dhismaha ciidan carbeed oo ay barakeeyaan dawladaha reer Yurub iyo Maraykanku si ay nacabka uga caabbiyaan dalalka Gacanka iyo kuwa carbeed una sugaan deggenaanshaha.*

6. *In dawladaha carbeed dhakhso looga hirheliyo tiiraarka dimuqraaddiyadda ku salaysan diinta Islaamka.*

7. *In si nabad ah looga shaqeeyo sidii loo heli lahaa Kurdistaanta Weyn, taasi oo yarayn doonta rabikaannada*

[1] Warbixintii Anwar Al-Cishqi ee lagu soo faafiyey warbaahinta oo qaybta Soomaalida ku saabsan la af Soomaali haltebiyey

dalalka Eeraan, Turkiga, iyo Ciraaq, oo mid kasta saddex meelood meel ahaan looga soo jaridoono Kurdistaan.

Waxaanu Sarkaalku hadalkiisii ku soo gabagabeeyey isaga oo u rajaynaya dalalka Gacanka nabad iyo is-af-garad."

Warbixinta Anwar Al-Cishqi ka hor waxa la ogaa dhagar Soomaali loo maleegayey, taasi oo qaar ka mid ah laga helay sirihii lagu kashifay Wikileaks gaar ahaan taararkii Sucuudiga sida hoos ku xusan.

Taararkii Sucuudiga ee laga helay Wikileaks

Taararkaa mid ka mid ah ayaa lagu sheegay jiritaanka dhagar la rabo in Soomaaliya afar gobol loogu kala qaybin doono. Laba Kiiniya la siin doono iyo laba la siin doono Itoobiya. In kasta oo aanu taarkani sumad iyo taariikh sugan midna lahayn, haddana, sida ay warqaddu tilmaamayso waxa laga diray Safaaradda Boqortooyada Sucuudiga ee Jabbuuti.

http://www.somalispot.com/threads/wikileak-says-somalia-will-be-split-in-to-four-region.12108/



وزارة الخارجية
MINISTRY OF FOREIGN AFFAIRS
Royal Embassy of Saudi Arabia
Djibouti

المملكة العربية السعودية
KINGDOM OF SAUDI ARABIA
سفارة خادم الحرمين الشريفين
جيبوتي

عن رئيس البرلمان اشار الى ان شقيق شريف حسن أدم يتواجد في مكتب الايجاد ويعتقد بانه صدر كنوع من المجامله له وأن له دور بارز في صدوره ويتوقع أستمرار رئيس البرلمان الجديد السيد / مدوبي نون الى نهاية فترة الحكومه الأنتقاليه وأنتخاب حكومه دائمه مضيفاً بأن مايشغل الحكومه حالياً ثلاث ملفات هي :

- الدستور
- الأمن
- المصالحه

ولم يخفي أنزعاجه لما يدور حالياً بين رئيس الوزراء السيد / عبدالولي محمد علي ورئيس أقليم بونت لاند السيد/عبدالرحمن محمد فرولي والسفير/ أوغسطين ماهيجا مندوب الأمم المتحده في الصومال الذي وصفه بتاجر القضيه الصوماليه والذي يهدف الى تقاسم السلطه القادمه عن طريق حل البرلمان وأعادة الانتخاب من ٢٢٥ عضوا يتم أختيارهم بطريقة ما تمهيدا لوصول السيد/ عبدالولي محمد لرئاسة الجمهورية والسيد/عبدالرحمن فرولي لرئاسة الوزراء.

وعن التدخل الخارجي أوضح بأنه أمر متشابك وأن الصومال أصبحت مرتع خصب للعديد من الدول وفي الوقت الراهن تتواجد عدة دول على الساحه الصوماليه ولها أدوار بارزه وهي على النحو التالي:

- الدور الكيني :- كان لها نشاط منذ مده ليست بالقصيره أذ قامت بتدريب مجموعه من شباب أقليم كسمايو في كينيا لكسب أيادي لها في الداخل الصومالي وفي الأونه الأخيره دخلت وتوغلت الى حدود ١٠٠كم في الأراضي الصوماليه بذريعة محاربة الأرهاب ومساعدة الحكومه الأنتقاليه في الصومال ويعتقد بأن ايطاليا تقف خلف كينيا في هذا الجانب وهناك نوايا لتقسيم الصومال الى اربعة أقاليم سيكون (٢) اثنان منها تابعه لكينيا و(٢) اثنان تابعه لأثيوبيا وأقناع الراي العام بأنه سيجري

Hayeeshee jiritaanka arrimaha ku xusan warbixinta sarkaalka Sucuudiga waxaa isna sheegay Raysul Wasaaraha Dalka Itoobiya *Hailemariam Desalegn* mar uu booqosho ku yimid magaalada Jigjiga ee dawlad degaanka Soomaaliyeed ee Itoobiya. Raysal wasaaraha oo waraysi dheer siiyey Cabdisalaan Hereri oo ka tirsan Universal TV baa yidhi sidan:

Cabdisalaan Hereri oo waraysanaya Raysal Wasaaraha dalak Itoobiya

Sawirka 8aad

"Waxaan rumaysnahay inaanay Soomaalilaan goonni uga bixin Soomaaliya inteeda kale ee laakiin dhammaantayo xitaa annaka oo Itoobiya ah, Soomaaliya, Suudaan, Ereteriya iyo Jabbuuti aannu isku noqonno waddan keliya oo midaysan. Laakiin taasi immika suurtagal ma aha oo laguma dhawaaqi karayo inay waddan keliya noqdaan. Waxay ila tahay inaan ku bilawno [Midn imo….]"

Runtii arrimaha uu Sarkaalka Sucuudigu warbixintiisa ku sheegay iyo ta uu Raysal Wasaaraha Itoobiya ku tibaaxay waraysigii uu siiyey Universal TV (Cabdisalaan Hereri) waxay markhaati u yihiin in Soomaali jab lala maaggan yahay, loona qoday uub, taasi oo haddii lagu dhaco aan laga soo bixidoonin. Waxaana hubaal ah in mashqac lagu eegayo dadka Soomaaliyeed oo la hubinayo falcelinta ay arrimahaasi ka bixiyaan. Dhabtiina ilaa hadda ma jiirto madax iyo dadweynaba cid si taban iyo si togan toona uga falcelisey. Aammusnaantuna, sida laga wada warqabo, waa astaamaha lagu yaqaan oggolaanshaha. Tii Allana Maqan!!

Arrin siduu doonaba ha ahaadee, waxaan mugdi ku jirin in Soomaali loo tashaday. Dawladda Sucuudiga oo ay dadka Soomaalidu u haystaan inay tahay dawlad Diinta Islaamka iyo dadka Muslimiinta ahba ilaalisa oo jecel baa loo baahan yahay inay aragtidoodii hore wax badan ka beddelaan. Sidaad waraysiga qaybiihiis kala duwan ka dhegeysan doontaan ama ka dhegeysateen, dawladaha Reer Galbeedka ayey ula kaashanaysaa sidii dalalka Islaamka qaarkood loo jarjari lahaa, badhka kale ee ay Soomaalidu ka mid tahayna gaalo loogu gacan gelin laaha.

Waxa kale oo iyana dib-u-eegid mudan joojinta ay markasta dawladda Sucuudigu joojiso iibsiga xoolaha Soomaaliyeed iyada oo ku doodda in arrimo caafimaad awgood loo joojiyo. Waxay aniga ila tahay in arrinku yahay mid siyaasadeed oo ah in Soomaali loo nugleeyo inay dullinimo oggolaato ama u jilicsanaato shirqoolka la la maaggan yahay.

Heshiiskii Ingiriiska lala galay iyo ujeeddadii ka damabeysey[2]

Hawlaha laga wado Berbera (Dekedda laga kireeyey DP World iyo Sal-dhigga laga bixin rabo), warbixinta uu Anwar Al-Cishqi bixiyey iyo arrinta uu Raysal Wasaaraha Itoobiya tibaaxay wax isku beegmay ma aha ee waxay ka mid yihiin qorshayaal Soomaali ku socda oo is huwan.

Sida horaba loo yidhi: Sooyalku isagaa isa soo cesha. Heshiiskani ma noqon doono kii u horreeyey ee ay Soomaaliyi la gasho dawlad shisheeye ah. Kii u horreey wuxuu ahaa kii lala galay Boqortooyadii Ingiriiska 1884kii. Kalgacal loo qabay Ingiriis loo lama gelin ee duruufaa keenay. Si aan u ogaanno duruufahaas bal aan isla akhrino qoraalka kooban ee hoos ku qoran:

> *Intaanu gumeysigu iman wuxu dalku, maammul ahaan, ka tirsanaa dawladdii Islaamka ee Cusmaaniyiinta. Waxana joogay ciidammo Masaariya. Kolkii uu mahdigii Suudaan ku kacay maammulkii Masaarida ee halkaasi ka talinjirey, ayey Masar 1884kii go'aansatay inay ciidankeedii fadhiyey Soomaalilaand la soo noqoto si ay awooddeeda meel isugu geyso. Dhanka kale waxa isna dal ballaadhsi waday boqorkii Xabashida ee Minilik kaasi oo ay ciidamadiisu u soo siqayeen dhinaca woqooyi.*
>
> *Xilligaasi dadka Soomaaliyeed beelo ayey u qaybsanaayeen. Sidaasi darteed, si ay uga hortagaan cabsida dhinaca koonfur galbeed kaga soo foollahayd may garan sidii ay cududdooda isugu geyn lahaayeen. Isla ammintaasi dawladaha Ingiriiska iyo Faransiiska ayaa ayaguna loollan xoog leh ugu jirey gacan ku haynta badda cas. Ingiriiska ayaa isagu aad u danaynayey oo intii uu Cadan gacanta ku hayeyba xidhiidh ganacsi la lahaa reerihii Soomaaliyeed ee xeebaha deggenaa.*
>
> *Kolkii ay runi run noqotay reerihii Soomaaliyeed waxay go'aansadeen inay heshiis la galaan dawladdii Ingiriiska si ay uga ilaaliso nacabka u soo hanqal taagaya inuu qabsado.*

Haddii aan tusaale u soo qaadanno qayb ka mid ah heshiiskii u horreeyey waxa uu u qornaa sidan:

Heshiis dhexmaray Dawladda Ingiriiska
iyo Odayada Habar Awal.

Juulaay 14dii, 1884kii

[2] Sooyaal: Ina Cabdalla Xasan Ma Sheekh Buu ahaa, Mise…?

Iyada oo la filayo inay ciidammada Masaaridu ka baxaan magaalooyinka Berbera, Bullaxaar iyo xeebaha Soomaalida guud ahaan, ayaa annaga oo ah odayada Habar Awal ee hoos ku saxeexani doonaynaa inaanu heshiis la gallo Dawladda Ingiriiska si aannu u ilaalinno madax bannaanidayada, una sugno kala dambaynta iyo sababo kale oo wanaag iyo waxtarba leh awgood.

Waxana halkan lagu heshiiyey laguna wacatamay qodobbadan soo socda:

Qodobka 1aad:

Habar Awal waxay halkan ku caddaynaysaa in loogu ballan qaaday inaan weligeed lagu dudduucin in la bixiyo, la iibiyo, la kireeyo, ama loo bixiyo in cid kale qabsato, dawladda Ingiriiska mooyee, qayb ka mid ah dhulka ay hadda degenyihiin, ama ay ka taliyaan.

Heshiisyadii ay shantii beelood ee kale la saxeexdeen dawladdii Ingiriisku sidaasi ayey u diiddanaayeen in dalkooda la iibiyo, la kireeyo am acid kale la siiyaba. Haddaba, haddii Ingiriiska oo heshiiskaa la la dhigtay uu wax khiyaameeyey, qaybo dalka Soomaalida ka mid ahaana uu kala siiyey Itoobiya iyo Kiiniya, isaga oo aan cidna kala tashan, maxaydin ka filaysaan Carabta iyada oo aan Soomaali u qarin waxay la damacsan tahay iyo halka ay ku waddaba?

Kanse waa maxay ujeeddada loola gelayaa?

Ilaa hadda, inta aan ka warqabo, lama hayo sabab dadka reer Soomaalilaan ku qasabta in saldhig la siiyo dawlad dhaqaale mooyee aan Soomaalilaan, dhanka ciidanka, tamar dhaamin. Soomaalilaan waxay in badan sheegtay inay aqoonsi raadis tahay. Haddana lama laha aqoonsi baa inoogu jira! Waxase, runtii, la oddorosi karaa Xidhiidhka ka dhaxayn kara warbixinta Anwar Al-Cishqi iyo Sal-dhigga Berbera.

Qodobka 3aad ee uu Anwar Al-Cishqi ku xusay warbixintiisii ku saabsanayd ka niib keenidda himilada iyo hanka siyaasadeed ee ay dawladdiisu ka leedahay Geeska Afrika baa ahaa: *Midaynta dalalka Golaha Iskaashiga ee Gacanka.* Dawladda Isu tagga Imaaraadka Carabtuna waxay marka hore xubin ka tahay Golaha Iskaashiga kor ku xusan. Marka xiga, dhaqaale mooyee, sidaan sheegay, itaal millatari ma laha. Sidaasi awgeed, waxaad dareemaysaa in Boqortooyada Sucuudigu qorshaynayso inay si dadban gacanta ugu dhigto Dekedda Berbera iyo baddeedaba. Waxaana hubaal ah in aragtideedii ahayd in dalalka Geeska la hoos geeyo dawladda Itoobiya ay si fudud u hirgelin doonto. Sidaasi awgeed, waa halkii Aw Gaase, haddii aan maanta arrintaa la hor joogsan, oo aan laga tashan, waxa aan muran ku jirin oo hubaal ah in meel

dheer laga dooni doono.

Guntii iyo gabagabadii, waxaan qoraalka kaga hadlay sida dhacdooyinka iyo ifafaalaha geeska Afrika ka dhacayaa ay innagu dhiirrin karaan inaan dareenno in aragtidii (AHUN) Dr. Cumar Cismaan Raabe ee uu ku oddorosay sida ay dawladda Itoobiya u qabsan doono dalalka Geeska Afrika iyada oo ku socota siyaasaddeedii ahayd dhul ballaadhsiga. Waxa kale oo aan ku eegay sida ay warbixintii uu bixiyey Anwar Al-Cishqi oo ah sarkaal sare oo ka tirsan Boqortooyada Sucuudiga iyo argtidii uu Raysal Wasaaraha Itoobiya ku xusay waraysigii uu siiyey Universal TV inna dareensiin karaan inuu soo dhowaaday xilli aan fogayn oo ay Soomaaliyi qarka u saran tahay in mar kale la gumeystaa. Waxa kale oo aan sheegy in heshiiskani aanu ahayn, noqonna doonin, kii u horreeyey ee ay dadka reer Soomaalilaan la galaan dawlad shisheeye. Hayeeshii uu jirey kii ay beelaha reer Soomaalilaan Boqortooyadii Ingiriiska la galeen duruufo nabadeed oo ku yimid awgood. Hase ahaatee, kan hadda la hadal hayo aan la aqoon sabab alla sabab keentay oo dalka loo kireyn karaa. Waxa haddaba xusid mudan in wixii shisheeye ka waayey oday dhaqammeedyadii Soomaaliyeed, maanta uu aqoonyahan ku sheeg heegan u yahay inuu dalkaba cidduu doolar ka heli karaba gacanta u geliyo. Waxaanan ku soo gunaanadi ereyadaa Abwaan Maxamed Xaashi Dhamac ee ahaa:

Anigana hadhaw iyo faallo

Halistaa inaan ka afeeftay

Oo weliba hiif iga gaadhay

Hagar-laawe ii geli buugga

Taariikhda aan wax hilmaamin.

Raadraac

Dr. Cumar Cusmaan Raabe, *Soomaaliyeey, Halkee Baad Ku Socotaa*?, Paris, Dec. 1989

Cabdiraxmaan C. Faarax 'Guri Barwaaqo' Sooyaal: Ina Cabdalla Xasan Ma Sheekh Buu ahaa, Mise...?, Hargeysa, 2012

http://www.somalispot.com/threads/wikileak-says-somalia-will-be-split-in-to-four-region.12108/